# 53 – AQAL V

**Axmed Nuur**
Weli waxaynu ku jirraa dooddii aanu ka doodeynay aqalka iyo waxa la dhigo ama aqalka iyo Gurgurkiisa, aqalka iyo Furayadiisa, aqalka iyo Maacuunkiisa ama Muleenkiisa ama Magaaddiisa. Weli waanu wadnaa oo odayaashaa ka doodaya maantana. Doodeenna maanta waxaa ka qayb gelaya: Fiqi Buraale, Daahir Afqarshe, Dhegaweyne, Cali Mudiir iyo Axmed Nuur oo soo jeedinta iyo warka qaybintiisa leh. Maantay, jaallayaal, dooddeenna waxay noqon doontaa, waa qubane warkeennu, isma xigo warku oo hadba waxa baa inaku soo baxayaa oo wax aad mooddeen in aanu ka tagnay baa inaku soo noqon doona. Maanta waxaynu ku noqonaynaa aqalkii miyiga iyo aqalkii magaalo ee is dhex yaalla weelkooda ama muleenkooda ama inta wax lagu cuno oo maacuunka la yiraahdo ayeynu weli ku dhex jirraa. Maantay erayga inoo ku horreeya wuxuu yahay Xeero. Xeeroy, maxaa laga sameeyaa? Imisaa qaybood bey xeeradu u qaybsantaa? Sidee baa loogu dhaqmaa?
Waxaan ku horreysiinayaa Daahir Afqarshe oo raggii yiri ah: "Xeero Fandhaal noogu keen faruhu waa ceebe".

**Daahir Afqarshe**
Axmadow, waad mahadsantahay. Xeero waxa la yiraahdaa shey laga qoro dhirta. Markaasuu kala yahay jaadad badan. Markaa sheyga qaaliga ah Galbeed buu ka yimaadaa geed la yiraahdo Garbi oo qodax yaryar leh oo sì gooni ah u baxa oo gun weyn leh, sida geedkan la yiraahdo Yaaqa. Xeerada dhirta caynkaas kale ah oo galbeed ka baxda ayaa laga qoraa Garbi baa la yiraahda. Xeeradan aad maqashaye la yiraah Xeero-adeyg ee dhulkaas laga keeno, dhulkaasey garbidu badan tahay. Geedkaas, dhulkan kale ee soomaali kuma badan ee galbeed buu jiraa, dhulka cadawgu ina ka haysto. Markaas, sida dheriga wanaagsani kolkuu qallalo haweenka sameeyaa farta sidaa ugu dhuftaan ee uu u danano oo kale ayey danantaa. Wax aan jabeynin weeye. Wax qurux badan weeye, shey qaali ah weeye. Iyadii noocyo badan bey u kala kacdaayoo xeero waxaa la yiraahdaa Xeero-ballaar oo waxaa xeerada soorta weyn ee diyaafadaha ah lagu guro, kuwana waa ka yaryar yihiinoo xad ma leh hoos bey u soo kacaan ilaa aad ka aragto mid yar oo Qoobad la yiraahdo oo ilmaha yar wax loogu rido, carruurta sidey u kala yaryar tahay, sida kuwaa aan wax wada cuni karin oon wadaageynin. Qoobad waa tan ilmaha yar wax loogu rido. Taa diyaafadda weyn lagu sameynayana wey u sarreysaa. Midi waxay leedahay afar rukun oo hoosta ah, Sifaalna waa la hoos dhigaa, kii aannu markii hore soo marray oo la leeyahay cuntada haddey ku daadato aysan guriga kale dhaamin. Xeeradan waa xeero weyn oo aan gurigaba laga qaadin oo markii hore ninkii xoolo leh u sameystay inuu diyaafadda uun ku bixiyo oo xeeryaha ka waaweyn oo rag tira badan ayaa gala. Markaasaa dabadeed, kolkey kuwaasi subagga iyo caanaha iyo bariidka ama haruurka lagu sameeyey ka fulaan in la eg baa markaana geli karta. Waxaa jirta xeero la yiraahdo Xeero-sibiri oo inta ayan jirin Fujaannada dibedda inoo ka yimid ahaayeen kuwa gabdhaha lagu raro ee

Muqmadda lagu rido ee la af-saaro ee dabadeedna dhulka maxfaka ah ee waaweyn afka lagaga gooyo ee satiyaalka leh oo waa xeero qurux badan oo sida fujaannada oo kale loo sameeyey oo waxaa la yiraahdaa sibiri. Xeeryuhu iyaga oo badan oo sidaa aan kuu sheegay taa weyn ee rukumaleyda ah iyo taa yaree qoobadda ah iyo xeero-sibirida iyo noocyada u kala kaca ayaan lahayn meel xad ah oo ay ku go'aan.

Ninkii nimanka kale maagayey wuxuu yiri:

"Rukumaley waxaan xeeradii ruuska uga buuxshay ama aan idaha raayax ugu dhigay sida tan roob laayey waxaan iri nimanki cirshiga raari jiray raabsi yey gabine".

Dabadeed, xeeradu sidaasanay xadna u kala lahayn una tira badan tahay, intii aan funjaankan iyo waxaanu ayan jirinna qorigaa uun baa ka shaqayn jiray waddankeenna. Maanta koobkan biyaha la darsanhayo ma jirin, kalax buu ahaa. Haantu waxay ahayd ama qori ama haan hooyadu toshay. Wax badan oo aynaan markaa u muxtaadi jirin oo aan dhulkeenna kaga manaafacsan jiray oo haweenka iyo ragguba ka shaqayn jireen yeynu ku noolaan jirray.

Axmed Nuur — Waxan u wareegayaa Fiqi Buraale. Fiqi Buraale waa ragga xeeryaha magacyadooda yaqaan oo waxaan moodaayaa inuu kaa badin doono Aw Daahir sababta oo ah waa wadaad. Fiqi Buraalow, adoo Fiqi ah maxaad xeerada qaybaheeda iyo intaa uu u qaybshe Aw Daahir maxaad ku dareysaa.

Fiqi Buraale — Intaas uu Aw Daahir yiri wax badan ku dari maayo, laba eray baase ku kordhinayaa. Xeerada yar ee Qoobadda la yiraahdo halka waxaa laga yiraahdaa Kurbin. Marka kurbintaasu waxay u gooni tahay, dadka badiba, Bunka. Maxaa yeelay dad walbaa belwad gooni ah buu leeyahayoo. Culumada koonfureed marka la xurmaynayo ee ama la duceysanaayo waxaa loo keenaa kurbintaa oo bun lagu waxeeyey. Marka caashaan la shiilo bunka oo la hagaajiyo yaa lagu shubaa kurbintaa. Halkaasey ku la baxday kurbin. Saddexda xeero ee kale waa la qabaa Aw Daahir. Kuwaas oo kala ah: Xeero-ballaar, Rukumaley iyo Xeero-sibirida. Laakiin waxaan ku daray kurbin. Geedaha kale ee xeero-ballaarta laga qoro, sida geedkaas garbiga la yiraah looga qoro galbeedka xagga kalana waxaa looga qoraa Yoocada oo waa iyadaa Kalaxa iyo Xeero-ballaartas labadaba la eg mana jabto ayada oo yoocadu ma jabtoo oo waa geedaha caanka ah. Xeero-sibiridaa anigu meeley inaga soo gashay garan maayo oo ma arag ayadoo la qoraayo xeero-sibiridaa, kana wanaagsan xeeryaha kale oo iyadu satiyaashaasey leedahayoo sida Aw Daahirba u sheegay oo xataa haddii wax lagu guro duxda kama baxdo.

Axmed Nuur — Waxaan u wareegayaa dhica kan Cali Mudiir oo raggii xeerada qori jiray ah oo Ceelbuur ka yimid, inkastoo adna wadaad tahay oo aadan yareysanayn.

Cali Mudiir — Horta waxyaaba badan waa iga badisaan odayaalkiinaan reer-nugaaleedka iyo reer-bariga ah, laakiin xeerooyinka anaa

idinka badsha. Sababta waxaa waaye ducadiinaba waa yar tahay. Badarka iyo beerahana maba tacbataan. Qoladiina waxaad ku badisaan fardaha, geela, isdhaca, badaha iyo kalluunka , laakiin haddii la yiraahdo halla sheego magacyada xeeryaha, cunta , sida loo kariyo iyo sida loo cuno iyo cirka taas idinku shaqo kuma lihidiin. Xeerooyinka waa badan yihiin laakiin aniga naftadeyda maskaxdeyda kuma wada jiraan, laakiin rag aad u yaqaannaa jira. Waxaan ogahay oo keliya inaan idinka idin ku dhaamo dhinacaas.

Horta xeerooyinka waa badan yihiin waxa loo isticmaalana waa badan yihiin. Marka u horreysa waxaa jirta mid la yiraahdo Kur-gergereed waxay ka timid tacdaarta ama kulanka dad badani isugu yimaado. Taas oo ah xeero weynoo in saddex afar nin ay qaaddo maahane aan la qaadi karin. Xeeradaas waxaa la soo saaraa awr ee dad ma qaado. Waxaa la isugu yimaadaa meel la yiraahdo Daharro oo la iskugu tago oo waa meel shir ahoo qabiil dhan isugu imaanaayo waaye. Meeshaas afar shan toddobaad baa la joogayaa. Reer waqooyinkiinaas toban nin intay cunto, hal nin baa cunaya halka, beentey maaha taas. Kur-gerger baa la yiraahdaa oo qoob bey leedahayoo waa weyn tahay oo dadkan gaagaaban maba gaaraan. Waxaa jira Kur-quraan oo ah wax uun lagu duceysto weeye. Waxaa jira xeero-dhallaan, sidaad u sheegteen, waa Qoobinta. Waxaa jira Seref. Waxaa jira Kur-durraamo. Durramo, gergerka iyo kur-quraan waa isku wada mid hase yeeshee waxay ku kala duwan yihiin habkey u qoran yihiin iyo weyninka. Badarka shirkaas loogu tala galay oo ay gabadha karin taqaan soo karisay mindiyaa lagu gooyaa ama abley oo wax kale laguma goyn karo. Badarka waxaa la yiraahdaa Badar-gerger. Bahalkaa weynaa lagu ridaa. Derin baa loo dhigaayaa nadiif ah oo saasaa loogu ridaa. Iyada nafsaddeeda mar hor subag bey leedahay oo badarku ku dhegi mayo, waa la ridaa, tooreeyaa lagu waxaynayaa, inta la jeexjeexo ayaa lagu ridaayaa. Bacdeyn raggu wey cunaayaan, waa la saaraa haddana. Markey xoogaa cunaanba waa lagu daraa. Haye yaa loo saaraa yaa la leeyahay. Kanoo kaleeto yaa gacanta lagu qaadayaa waa lagu daraa, caanaha waa loogu daraayaa. Sida uu sheegaayo, dhallinyaradu waa meel, germadowda waa meel, culimadu waa meel, culumada waxooda waa dhadhamiyaa. Cunto aan la soo dhedhemin culumo looma geeyo. Caanaha, hilibka iyo cuntada culumada, goobta iyo odayaasha waa mid gaar ah; dhallinyaraduse waa iska caadi. Bacdeyn toddobaad dhan baa lagu cunaayaa. Markii la dhammeeyo cuntadaas, wixii ka hara waxaa qaata geeleyda. Badarkaas usbuuc hadduu yaallo ma halaabaayo, waa uun dhagax oo caanaa lagu cunaa. Badarkaa mar waa meseggo si gaar ah loo kariyey, marna Diir. Laakiin diirtu sidaad idinku u maqasheen maaha. Diir budaa la yiraahoo waa gooni, weyna ka macdahay midda kaleeto. Meseggada iyo diirta, diirtaa markii sì fiican loo karsho diirtaa mac. Haddiise adiga lagu siiyo ma kala garanaysid. Waxaa jira mar digirta iyo la isku ayimo meseggada ama gocoso iyo diir. Marka la isku ayimo waxa kan macaanta badan waa garanaysaa, laakiin wuxuu yahay ma taqaanid. Markey jiilaal tahoo

caanuhu badnayn waxaa lagu cunaa subag iyo maraq. Marka caano jiraanna waxaa lagu cunaa caano ama geel ama ari. Waa hubaa, reer waqooyinkiinaas toban nin oo ah inta ay cunaan waxaa cuna hal nin oo halkan ah. Marka dhallinyaradaasu ay wax cuneyso, waxaa laga yaabaa, inay laba saac u fadhiyaan. Weliba cunnada waa lagu baratamaa, gacantaasaan lagu cunayaa. Ninkaas dhallinyarada ah gacantiisaasu mar intay qaaddo adiga waa ku deeqdaa. Marka waxaa la yiraahdaa shan farood iyo calaacal. Marka badarka dabciddiisa, weelasha ama lagu kariyo ama lagu cuno iyo sida loo cuno waa la idinka badshaa.

Axmed Nuur Waa maroo, horta Cali waa u maleynaynay inuu xeeryaha naga badiyo oo wuxuu isku darsaday dhowr waxyaabood. Waa mare xeerada xarunta lagu sameeyo ama farsamayahaniinta soomaaliyeed meesha ugu farsamayahaynsan ayaa, hadduusan ka iman, aabihii ka yimid oo gurigoodu sheekadu wey taallaa. Xaruntaasu waa Ceelbuur, waxaa lagu sameeyaa Dabqaadka, Burjikada, Xeeryaha, Girgiraha iyo waxaa Soomaaliya wada gaara oo alaabtaa u badan oo dhan. Ceelbuur waa xarunta alaabadaa. Meel kaloo alaabtaas lagu sameyo wey jirtaa, laakiin Ceelbuur waa xarunteeda. Ceelbuur wax ama meel xagga farshaxannimada kaga horreeysaa ma jirto. Annagu kolley haddaan reer Bari nahay waan uga dambeynaa oo waxay noogu sheegaan baan u qaadannaa oo aan idinka idiin soo gudbinnaa qoladiinaan geel jirta ah.
Haddii xeero laga hadlo waa in isaagana Fandhaal laga hadlo. Fandhaalku imisuu u qaybsamaa? Maxaa laga qoraa? Sidee loogu dhaqmaa? Hawluhuu qabtaa waa maxay? Haddii xeero laga hadlay fandhaal baa xiga. Waxaan ku horreysiinayaa Fiqi Buraale.

Fiqi Buraale Fandhaal marka la yiraahdo anigu saddex baan u aqaan. Marka ugu horreysa waxaad ii qabataa midka ugu weyn oo la yiraahdo Bixiye. Bixiye waa qori, waxaana laga qoraa geed. Bixiyaha Yoocada waa laga qoraa fandhaalka. Hadduu yar yahayna waxaa laga qoraa Himirta. Himirtu mirana waa leedahay oo waa la cunaa oo Hawdkey badiba ku badan tahay oo xaggaan ma jirto. Geedka himirta quruxdiisana waad yaabeysaa oo wuu dhalaalayaa oo isagu had iyo goor wax la mid ah jiraan oo gas ma yeesho. Laakiin yoocadu gas bey yeelataa kalaxeeda iyo bixiyaheeduba. Bixiyahaas waxaa bixiye loo yiri: Haanta la lulaayo ee caanaha lagu lulaayo, subagga marka laga bixinaayo isagaa lagaga soo saaraa oo isagey haweenka kaga soo xaabiyaan oo Burcadkey ku soo qaadaan. Waxaa jira oo ku xiga mid la yiraahdo Dhure. Dhuruhu waa ka yar yahay bixiyaha, waana ka dhuuban yahay, saasaan dabadiisu u dheertay afkiisuna waa ka yar yahay. Kaas Dhure ayaa la yiraahdaa oo Ubbooyinka ama Baarrooyinka ayuu dhexdooda ku jira ama loo daayaa oo subagga mar laga soo qaadayo, illeyn gacan la gelin maayee, kaasaa lagaga soo qaadaa subagga Maakhiriga ah. Subagga marka la shiilaayana waa lagu dhuraa dhuraha oo naag haysata waa ku dhurtaa oo saasaa dhure loo yiri. Waxaa jira markaa Fandhaal-sooreed oo ah kan yaree xarxadhane quruxda badan, qaar wax baa lagu cunaa qaarna waaba iska

yaallaanoo marka rag aad xil kala mudan tihiin yaa wax loogu soo ridaa oo xeerada inta la kariyo bariidka oo la geedeeyo oo subaggii lagu soo daro, haddey saddex yihiin iyo haddey afarta yihiin ayaa dhinacyada xeerada loo saaraa. Fandhaallada tiradoodu waxaa lala ekeysiiyaa tirada ragga xeerada wada gelaya oo wax ku cunaya. Fandhaalka inta badan waxaa laga qoraa geedka himirta la yiraahdo. Marka, fandhaallada anigu saddexdaa yaan u kala aqaannaa.

Axmed Nuur	Waxaan ku wareejinayaa Dhegaweyne.

Cabdi Dhegaweyne	Anigu haddaan Dhegaweyne ahay intaan aqaan baan sheegayaa. Horta waxaa jira midaan kuwaa ahaynoo waxaa la yiraahdaa Qudde. Qudduhu waa kan subagga la daree ragga subagga lagu siiyo, kor buu u qorabyahoo wuxuu qaadaa in nin deeqda oo qaarna waa siman yahay qaarna korbaa sida xeeradii loo qoraa oo sidaasuu u girgir dheer yahay. Halkeer salka ay ka gooyeen oo ay ka qorqooreenna kor bey uga qaadeen oo labadii dhinacba kor bey uga qaadeen. Marka nin buu deeqaahoo weel bey u saaraan intey subaggaas intaa ku rujiyaan, markaasaa hilibkaa lagu siiyaa. Dhirta laga qoro Qabaalka iyo xeerada waa isku mid oo labaduba isku dhir baa laga qoraa. Qabaalka, xeerada, quddayaasha iyo waxaa meel baa laga wada qoraa. Waxaa soo raaca geed la yiraaho Goosir oo isna Hawdka ka baxa oo qabaalkaa, quddayaasha, Qalaxaba iyo xeeryaha laga qoro, waa sal waaweyn yahay, moqorrana waa leeyahay. Waxaa jira geed kale oo fandhaallada la saantay isna laga qoro oo hawdka ka baxa ee la yiraahdo Jawadheer. Quddayaasha iyo bixiyaha waaweyne waxay u badan yihiin jawdheertaa. Waa geedka Dhakalka geela lagu maalana laga qora, qabaalladana waa laga qoraa. Geed kalaa isna jiro oo wax laga qoro isna waxaa la yiraahdaa Qararrada oo isaga qabaalladaa laga qoraa oo wax kale lagama qorto. Yoocadana, sida qaalibka ah, fandhaal lagama qoro iyadu dhakalka geela lagu maalayo, agaamaha haamaha la dhaansanaya iyo waxaasaa laga qoraa. Yoocada fandhaallada laga ma qoro sabatoo ah gas bey leedahayoo gastaas ayaan laga goyn karin. Himirta, jawdheerta, geed la yiraah Ontorro, Goosayga, shillilka iyo waxaasaa laga qoraa bixiyayaasha iyo fandhaallada. Dhirtaasoo dhan ayaa iyagana laga qoraa oo dhirta waa kala leeyihiin qoryaha. Geedaha la kala yiraahdo yoocada iyo qararrada waxaa laga qoraa qabaallada iyo dhakallada iyo waxaasey u badan yihiin oo waa Geed-nugeyl. Dhirta qaarna markuu jabo weelka laga qoray qaarna waa kala duuduulaa, qaarna waa dillaacaa. Marka naagaha reer miyiga ah weelasha ka jaba waa kabtaa. Dhirta kale waa kala duuduuleysaa markay jabto oo ma kabanto, illaa yoocadu iyo goosaygu labadaasu waa kabmayaan. Haweenka intay afka isu saaraan bey tolayaan markaasey intii in la eg dib dhaansanayaan oo wax ugu maalayaan.

Axmed Nuur	Waxaan ku wareejinayaa Cali Mudiir.

**Cali Mudiir**

Wallaahi isku mid baan nahay oo waxaas waxba ku kordhin maayo. Midka bixiyaha aad u taqaanaan anigu waxaan iraandaa Qarsin. Far baa jirta ayaduna, fandhaal baa jira, Gure ayaa jira isna. Anigu Dhure waxaan u aqaan midka ceelasha biyayareeya biyaha looga dhuro. Qarsin waa midka badarka dheriga looga soo saaro. Far waxaa la yiraahdaa mid ilmaha yaryar wax ku cunaan. Gure iyo fandhaal oo isku mid ah waxaa la yiraahdaa midka dadku ku wada cuno. Waa runtiis Faqi Buraale, fandhaalku siduu u kala qurxan yahay iyo siduu u kala habsan yahay ayaa akhyaarta wax loogu kala siiyaa. Badarka kan lagu ayimo annagu waxaan niraahdaa Ayime ama Laan.

**Axmed Nuur**

Anigu ninka la yiraah Cali Mudiir waxaan ku ayidayaa bixiyaha annaguna qarsin waa niraahdaa. Waxaaba jirta oo la yiraahdaa: " Hebel qarsin qallooc baa ku dhacay". Waxaa kaleeto oo aan anigu ku dari lahaa midka uu Cali Mudiir yiri midka lagu ayimo waxaa soo racaa oo aan ku darayaa mid la yiraahdo Malaakha iyo Xubin. Isla marka magacii fandhaalka ee sare waa wataan. Waxaa kaleeto jira mid annagu aan niraahdo Turunji oo ah kan digsiga weyn oo wax lagu kariyo kan lagu walaaqo (Baasi).

Waxaan ku wareejinayaa Daahir Afqarshe sì uu magaalada iyo miyiga isu xiro.

**Daahir Afqarshe**

Wixii waxba kama dhinna oo waa la wada sheegay, haddii lagu wada noqdana waqtiguu inaga qaadayaa. Wax anigu aan aqaan oo aan la sheegin ma jiraan. Dhirtase wax laga qoro, haddeynu dib ugu noqonno, waxay u qaybsan tahay geed dhuux leh iyo geedaan dhuux lahayn, geed adag iyo geed Quwaax. Geed-quwaaxa waxba lagama qorto oo waa geedkii jilicsan oo markaad calaliso dheecaan macaan leh. Marka dhirta adag ee aan kuwaa ahayn weeye horta dhirta wax laga qortaa. Dhirta waa fara badan tahay oo ninka qoraha ah ayaa garanaya. Qoruhu mar meesha uu joogo dhirta ka qormi karta ayuu garanayaa. Ubbooyinka waxaa gaar ahaan laga qoraa Xagarka. Sidaa loo sheegay, haanta iyo kalaxa waxaa laga qoraa geed aan halka lagu soo qaadin oo la yiraahdo Mooli. Geedkan mooliga Bari waa ka baxaa. Mooli waa geedka mayraxdiisanu laga sameeyo raradan xariirta ah. Mooliga wuxuu u egyahay Yaaqa oo wuxuu u baxaa mudh oo samadaas buu isku shareeraa. Markaasuu markuu dusha u baxo ayuu sida dharkeynka iyo Cawbaarka intuu saa u baxo ayuu har weyn bixiyaa. Markaasaa caleemihii cawbaarka yaa laga sameysanayaa xargaha. Geedka la yiraahdo Mooliga iyo geedka la yiraahdo Morohda waa kala gooni. Mayraxda morohda waa tan laga sameeyo haruub-gaalka oo aan weligii waxba noqonayn.

Markaa mooliga guntiisii dhuubnayd baad doonaysaa inaad afar haamood ama shan ama inta uu gaaro ka sameysato. Geedka hoostaad ka goyneysaa, marka uu dhaco dhuux buu leeyahay weyn.

Dhuuxaasaa ka dhex baxaya markaasuu noqonayaa haan qoton ah. Markaasaa xagga dambana looga sameynayaa gun, oo hooyooyinka ku sameynayaan oo jiq laga siinayaa; xagga horana

luqun uun baa looga sameynayaa. Geedkaas haamahaa laga qoraa moqorna waa yeeshaa. Yoocada haamahaa laga qoraa. Dhirta caynkaas ah weelashaa laga qoro waa tan kala go'do oo waa la kabaa. Laakiin dhirta kale ee firdheysa waa tan laga qoro fandhaallada iyo xeeryaha. Dhulka xeebta ah waxaa ku badan geedka la yiraahdo kullanka, garaska iyo quudka. Haddaba haddaanu nahay dadka Nugaal iyo Hawd ka yimid ee aan beero lahayn, qaaryagu daraawiish buu ahaa. Marka waa tii daraawiishta nooga timid Hiiraan daacuunka nagaga dhacay, markey caanihii iyo hilibkii iyo subaggii cuneen oo waa tey madheen. Markaasaanu niri 'waxanu waa maxay?' Kuwii waddanka joogay waxba noqon maayaane, malaha badar bey doonayaan dadka kanu. Markaa dabadeed waa annagii dhulka saracnay. Markaasaanu dabadeed cilmigii u soo noqonay oo markaasaanu geedka kan xurbinka ah baranayoo lagu walaaqo badarka la kariyey ee adag. Garawga iyo koronkorka waa laba isdhalay oo kala horreeya. Haddii isha uun laga tuuro waxa la yiraahdaa koronkor. Garawna waxaa la yiraahdaa marka isaga baalka laga tuuro ee aan la burburinoo; marka la jabiyana jariir baa la yiraahdaa; markey bislaatana budadeedaa lagu daraa oo marka lama jiirayo markaas weeye.

Axmed Nuur: Annagu reer bari haddeynu nahay, xeero yaab leh bey leeyihiin reer barigu. Waxaa jira Karuunkutaale.

Cali Mudiir: Beero horta ma lihidiine wax kale sheega.

Fiqi Buraale: Marka goonka iyo gocosada iyo badarka mid waliba goonidi loo sameeyo ee shiidkooda laysku daro oo jariirta noqdaan waa cunno wanaagsan.

Axmed Nuur: Annagu goonka iyo gocosada ma cunno oo reermagaal baan nahay.

Fiqi Buraale: Sida aynu u kala badinno waxaa la ogaaday, halka kan, markii aannu wax baarnay. Qoladayadan Bari ka timid iyo qolada Nugaal ka timid iyo nin hawd isaga iskaba daayoo, Cali Mudiir guriguu ka yimid yaa naga wada badiya. Waxaan ogaaday halka kan rag aroos ah oo la yiri waxaa loo sameynayaa cashaduu caawa cuni lahaa. Markaasaa la yiri. Waxaa la sameynayaa qarahakan iniinihiisa ayaa inta la mayro la saloolayaa. Marka la saloolo ayaa mixdin la marinayaa. Markaasaa gocosadiina mixdin la marinayaa, markaasaa caano riyood lagu karinayaa, markaasaa dhir udgoonna lagu karinayaa, dabadeed qoobaddii baa halka loo dirayaa. Ninkii arooska ahaa taa uun buu cunayaa dabadeedna waa inuusan habeenkaas seenin.

Axmed Nuur: Horta Cali Mudiir inuu badarka beerto waa run, inuu naga badiyana waa run. Laakiin sameyntiisa iyo reer-magaalnimada iyo cilmiyada la soo guuriyey ama Beersiya laga soo guurshey ama Caraabiya laga soo guuriyey ama Shiino laga soo guurshay reer bari ayaa soo guurshey. Inta cilmi oo reer barigu ku darayaan haddaad ogaan

lahaydeen waaba mareeri lahaydeen. Reer barina ma aydan arage ee hal hal soo dagaagaad aragteen oo meelahan jooga ayaad aragteene reer bari ma arkin.

Cali Mudiir — Horta waxaan la yiraahdo ilbaxnimada iyo xiriirka caalamiga ah oo ama Hindiya ama Afrika ah ama Carab iyo xadaarad duqowday reer bariga lagula tartami maayo. Wixii kula tartamana waa dhinacaa Seylac iyo waxaas. Waxaa kale oo ku la tartamaaya xeebaha Benaadir. Waxa yaan laysku qasin oo wuxu sey yihiin halloo sheego. Fardaha iyo geela waad ka badisaan, laakiin wixii ka yimid dibed waxaa looga dambeeyaa reer bari iyo dadka xeebaha dega.

Axmed Nuur — Waxaa jirata, marka u horreeya markeynu leenahay dhaqan wuxuu guuraa goorti shakhsiyadu meeshaasu baabàdo. Horta reer bariga shakhsiyadoodii ama dhaqankoodii waxaa ugu dambeeyey 1935kii. Markaan leeyahay 35kii baa ugu dambeeyey, magaalooyinkii waaweynaa oo ilbaxnimooyinka gaarka ah lahaa oo aad iyo aad loo danayn jiray waxay baabà een shan iyo soddonkii intii ka dambeysay. Sababta oo ah magaalooyinkii dadku hijrada ku sameynayey waa laga soo guuray oo badi waxaa la soo galay Benaadir, Kismaayo iyo meelahaas. Ha soo galeene, dadkii markay soo galeen waxay qaateen shakhsiyadii Benaadir oo dhaqan kii iyo dabeecaddii Benaadir bey yeesheen, cunadii Benaadir bey raaceen oo dadkii reer banaadir camal bey noqdeen. Haddaad hadda aragto dadkii 35kii yimid ama carruurtooda aragto aqoon maysid oo waxaad oranaysaa waa reer Benaadir. Marka dadkaas cunnadoodii wey beddelan tahay, magaalooyinkii sida Hurdiya, Xaafuun, Beyla iwm wey baabe'een oo dadkii ka soo guuray waxaa beddelay dad reer baadiya ahaa. Benaadirna shakhsiyadiisii waxay baabàday markii af soomaaliga la qoray oo afkii reer waqooyiga iyo reer mudugga iyo reer bariga af soomaali loo qaatay. Markaa wixii ka dambeeyey ardaydii waxay baratay dhaqankii waqooyinga iyo gobollada dhexe. Maanta ardayga soomaaliga ah waxaad mooddaa Nugaal inay ku dhasheen.
Haddana waxaan u gudbeynaa erayga Jiinbaar, Sadqad, Daragad, iyo Sariir. Bal intaas eray oo isku dhowdhow oo magaca sariirta wada sita, mid waliba waxay tahay; waxay qabato iyo mid waliba waxa laga sameeyo. Waxaan ku hormarinayaa ninka la yiraahdo Fiqi Buraale.

Fiqi Buraale — Horta, waxba wax bey ku lammaansan yihiin. Anigu sidaan u aqaanno waxa la yiraahdo Jiinbaar qori iyo Saan bey ka sameysan tahay. Afar Rukun iyo laba qori oo docdoceedka ah lixdaas qori iyo saan dibi ama lòba ayaa laga sameeyaa bahashaa jiinbaarta la yiraahdo. Jiimbaarta waxaa ku lammaan oo ay mar soo wada baxeen Gambarka. Gambarku afartan rukun lagu fariisto, waa sida trenta qatraha iyo fatuurada oo tii ninku yiri: "War kaas weyni ma midka yaruu uu eryaayo ma hooyadiis baa". Haatan bahalka gambarka la yiraahdo jiimbaartuu daba ordaa oo waa saldhigga nasashada, jiimbaartuna waa saldhigga nasashada oo waa sariir

oo waa la isku jimciyaa oo waa lagu seexdaa, markuu kul jiro baa bannaanka loogu soo baxaa, dadka ma wada laha oo nin gaar ah baa leh, waxayna inaga timid geestaa xagga Webiga ah.
Bahashan Daragadda la yiraahdo waxa weeye, anigu saan u aqaan, qoryo la teeday iyo kuwo dhuudhuuban oo dusha laga saaray oo markaas la isku xirxiray oo la wanaajiyoo sidii gogol oo kale ah, caashaan sidii sariiroo kale noqota, dabadeedna la saaro saan oo guriga dhexdiisa taal oo ayadu ma socoto. Daragaddu waqooyi bey ku badan tahay. Weliba xagga galbeedka ayey u badan tahay daragaddaasu.
Sadqadda bahasha la yiraahdo waa aqaannaa laakiin macnaheedu waa iga khaldan yahay. Laakiin saddexda kale sidaasaan u aqaan, sadqadna idinkaa iigu dari doona.

Axmed Nuur — Aan ku horreeyo anigoo reer magaala iska dhigdhigaya.
Daragad iyo Jiimbaar waa kugu waafaqay oo waa sida aad u sheegtay. Laakiin sadqaddu waxay u dhowdahay geedka la yiraahdo daragadda oo waa Sadaq yaci qoryo yaryar oo saa loo sadqay oo la isku xirxiray oo markaa tiirar la sameeyeyoo la saaro sadax. Daragad waa ka duwan tahay oo sadqadda inta la laalaabo ayaa la qaadan karaa. Sadqadda waxa aalaaba isticmaala guryaha aan laga guurin oo iyada iyo Aloolku waa isla mid oo qolada webigaan laga waayin.
Sariitu magac sii fidsan bey leedahay. Waxaa jira Sariir-maamuuseed, waxaa jirta Sariir-caddiir, waxaa jirta Sariir-goleed, waxaa jirta Sariir-bir iwm. Sariirtu waxay had iyo goor ku magacaaban tahay waxa ama nooca ay ka sameysan tahay oo haddey jiimbaar ka sameysan tahay waxaa la oranayaa sariir jiimbaar ah, haddey daragad ka sameysan tahay waxaa la oranayaa sariir daragad ah, haddey looxyo waaweyn ka sameysan tahay waxaa la yiraahdaa sariir maamuuseed, sariir bir ah, sariirtan hadda la baxda Foormikada oo hadda guryaheenna taalla.
Haddana waxaan ku wareejinayaa Maryan Faarax oo aan ka bi'iyey.

Maryan Faarax — Waxba ma aadan bi'ine. Horta waxa sariirta la yiraahdo oo lagu dhaqmo, miduna waa wax aan annagu sameysanay oo dhaqanka soomaalida ah, miduna waxa weeye wax dibed nooga yimid. Waxa aan annagu sameysanay oo aan dhaqan ahaan u leenahay, inkasta mar kastaba dhaqannadu isku dhex jiraanoo wax kala qaataa, bal annagu aan isweydiinno ma uga horreeynay mase waa nooga horreeyeen. Marka sadqadda iyo dargadda, jiimbaartu waa u dambeysaaye, la sameynaayey yacni ilaa heerkee bey soo socdeen. Horta waxaa jiray kuwii geedaha korkooda la saaran jiray oo ahaa Raarkii, dabadeed daragaddii baa timid oo dhulkaa loo soo degtay. Aakhirkii waxaa loo soo degtay daragadda iyo jiimbaarta oo iska joogtoo aan marna meesha laga qaadeyn. Taasna waxay na tuseysaa ilbaxnimo uu dadku soo ilbaxayey ee uu soo hormarayey. Marka markii dambe waxaa la keenay jiimbaarta tan oo ka sameysan harag iyo qoray taasoo quruxna leh, waqti dheerna joogeysa aadna qaadan kartid oo lala guri karo. Intaas oo dhan

waxay na tuseysaa ilbaxnimada iyo horumarka ay soomaalidu ka gaartay sariiraha. Kaddibna waxay ku soo xijiyeen sariiraha Caddiirka, inkastoo taas ay na la wadaagto dunida kale, gaar ahaan carabta. Marka caddiirkaas sidii loo waday waxaa la keenay haragga in la isticmaalo. Noocyada sariiraha kale waa kuwa dibedda nooga yimid. Sariirmaamuseeddu waa sariir qoray ah oo dibedda ka iman jirtay oo alwaaxyo iyo dhinacyo qurux badan lahaan jirtay amase waxay lahayd laba madax oo qoray saad ah, welina waa la helaa. waayuhu waa soo socdeen oo sariir bir ah baa timid oo ayaduna nooc waliba leh ( kuwo dhaardheer, kuwo gaagaabanba ).
Waxaa yimid sariiro gaagaaban oo foormiko la yiraahdo oo tii hore ka gaaban oo kana qurux yar. Foormiko waa iska af talyaani.

Axmed Nuur — Waxaan ku wareejinayaa Cali Mudiir.

Cali Mudiir — Anigu waxba ku kordhin maayo. Horta erayga kan oo la yiraahdo naamuusiyadda oo nooga yimid xagga Sinsibaar. Eryaga naamuus la yiraahdo waa kaneecada, waxa loogu magacaabana waa kaneecada, sababtana waxay tahay, waxay wadataa rukumo dheerdheer oo qab lagu siinaayo maradii loo sameeyey. Sariirnaamuusiyad waa sariirtii naamuusida laga hoos gelaayey. Sariirtaa odayaashii hore ee reer xamarku wey haystaan. Sideedana sariiraha kale waa ka fiican tahay waayoo alwaax ayaa lagu seexanaayaa oo ka caafimaad fiican tahay. Jiimbaartu fasiraad bey rabtaa. War jiimbaarta seexasho looma sameyn. Waayihii hore, dhulkaan Benaadir waxaa jiray addooman, fiyuudaal baa jirayoo, dhulgoosi baa jirayoo waxaa jirtay balaayo baas iyo isgumeysi. Marka ninka boqorka ah ama suldaanka amba hoggaamiha qabiilka dadka waaweyn oo caynkaas ah ayaa horta sameysan jiray sariirnaamuuseedda. Afarta rukumaa intala qabto oo la qaado ayaa  marka ninkaa suldaanka ah la duuba ayaa magaalada lagu soo wareejin jiray. Marka ninka dhulgoostaha ah baa addoontiisa intay sameeyaan ayey marna ku qaadi jireen marna uu bersadda kula dul nasan jiray. Jiimbaartu ayada laguma seexdo ee waa lagu nastaa ama waa lagu nasan jiray, bersaddeyna taallaa. Odayaashaasu jiimbaarta marna waa ku dukadaan marna waxay ku qaabilaan dadka oo salootada ayey taallaa. Hadda markii wayaabahaas oo dhan suuleen, jiimbaartu waxaa loo isticmaalaa sida Kursijiifka oo kale. Marka jiimbaartu waa shey raaxo raaxo ayaa loo qaataa oo boqorrada iyo salaadiinta ah ka sokow dadka ladan oo dhan baa qaata. Haddeertaan haddaad tagto Mahadayweyn shanboqol oo shilin baa ka soo siisaneysaa iyadoo caalami ah. Weliba ninka heli kara jiimbaartu waa qurux badan tahay oo waa raaxo, waa lagu dukadaa waa lagu berseeyaa, ilmaha yaryar waa lagu seexshaa oo haddey ku kaadshaan biyaa saa looga marinayaa. Waxaan ku wareejinayaa Daahir Afqarshe.

Daahir Afqarshe — Waxaan u noqonayaa sariirta la yiraahdo naamuusiyada.  Sariirta naamuusiyadda la yiraahdo waxay nooga timid Sinjibaar ama Sinsibaar. Sariirahaas waa kala laba nooc oo waxay kala yihiin

kuwa Hindiya ka yimaad iyo kuwa Sinsibaar ka yimaadda. Labadaa nooc waji ahaan waa isku egyihiin laakiin waa kala qurux badan yihiin, waana kala sameys wanaagsan yihiin, waana kala ballaaran yihiin. Sariirtaas geedka laga sameeyo waa saad. Markaas ay tahay labada dhinac, labada rukun ee ugu horreeya labada waji waxay ku leedahay laba muraayad, markaasaa shimbiro ama geri ama shabeel ama biciid ayaa lagu masawiraa. Tan Sensibaar iyo tan Hindiya wey kala buurbuuran yihiin oo wey kala fududyihiin. Mid weliba tey ka miisaan weyn tahay bey ka wanaagsan tahay. Marka iyadu waa qorigaas dheer ee afarta rukun leh. Marka afartaas rukun joogaan bey misane mid dhexdaa ka duleeshaa, markaasaa mid kale la sii geliyaa. Kuwaasaa maradoodana geb lagu soo siiyaa dabadeed oo irrid yaroo laga galo ayey leeyihiin. Marka waa sariiraha qaaliga ahee aan guryaha ka bixin, dadkoo dhanna ma wada lehee, dadkii hore ee asaliga ahaa ee reer xamarka ahaa ama reer markaha ahaa ama reer baraawaha ahaa ama reer seylaca ahaa baa haysan jiray sariirahaa. Dabadeedna sanco waliba sancadey ka dambeysay wey ka liidataa. Wax waliba waji cusuboo wanaagsan bey kugu soo gelayaan kadibna waxaad arkeysaa ayadoo sii liidata.

Taas kale ee jiimbaarta ah waa sidaa uu sheegay Cali Mudiir oo shey raaxo oo kuraasadii jiifka ahaa meeshii ay geli jireen ayey ku jiraan.

Waagii hore gogosha dhulkaa la iska dhigan jiray oo la jiifan jiray. Maxaa marka la soo saaray? Shillakayagii. Shillalkaas aynu annagu soo saarnay oo loo sameeyey sì hilibka aysan carradu u gaarin looga ilaalinaayo yaa dadkii intuu carrada jiifi lahaa inuu daragadda iyo jiimbaarta iyo waxyaabahas sameeysto.

Axmed Nuur — Anigu intaa waa idin ku waafaqsanahay, hadalkana ma sii madinayo. Magacaa naamuusid iyo maamuusid labadu waa i soo mareen oo soomaalidu waa ugu dhawaaqdaa, Bari iyo qoladan Benaadi iyo Seylac iyo meelahaas, dhulka saraha waaweyn leh, dadka ladani wey haystaan. Maamuusiyad marka la yiraahdo waa wax maamuus ah oo sariir nin weyn mooyee nin kale uusan ku seexan. Naamuusiyadna waa sida Cali u sheegay oo waa midda kaneecada lagaga dhuumanayey.

Waxaan marka imanayaa wax aad u yaab badan oo aad arki doontaan oo dadka qaarkiis ay ku yaabi doonaan maqalkooda. Waxaas yaabka leh oo ah Derin ama Darmo. Derintaasu waa wax ama shey aad iyo aad guriga, dhaqan-dhaqaalaha, door weyn ka qaadata oo seexashada qayb ka qaadata. Derinta magacyadeeda baan isku deyayaan anigu bal inaan dulmaro. Kow, waxa waaye Salli, waxa waaye Sujaayad, waxa weeye Jeexgogol, waxa waaye Iskushub, waxa waaye Dhamac, waxa weeye Feylati, waxa weeye Xiriir, waxa weeye Ceshiime, waxa weeye Beexaaney, waxa weeye Darfooley. Derintaas cawda laga sameeyey baa intaas u kala baxday. Marka intaa oo muhim ah oo guriga dowr weyn ka qaadata oo dhaqankiisa xaggiisa dowr weyn ka qaadata ayaa doodeenna soo geli doonta waa idiin hal haleyn doonaa. Derin horta waa guud ahaan oo wixii la goglo oo dhan ayaa gogol ah oo xataa waxaa soo

gelaya Kebedda derin bey noqonaysaa. Dermooyinka waxaa sameeya gabdhaha farshaxanka la baxay. Gabdhaas hadda ma jiraan oo hal lama heli karo, gaar ahaan kuwa yaqaan darmada loo yaqaan ceshiimada guriga intuu la egyahay oo dhan ayey la egtahay. Guriga dermada noocaas ah lagu sameeyo ama la dhigo Feynuus uma baahna. Magaalooyinka dermada ceshiimada la yiraahdo caanka ku ahaan jiray waxaa ka mid ah Beyla, Xaafuun iyo Seylac, khaasatan Beyla iyo Xaafuun.
Waxaan ku wareejinayaa Cali Mudiir. Caliyow derin ka soo baxaye bal Salli ka hadal.

Cali Mudiir — Waqtigaan hadda la joogo, noocyadaas Bari yey u badan yihiin. Bari waxaa laga soo raraa baabuur tira badan oo dermooyin ah, inta badanne waqooyi ayaa qaadata. Dermooyinkaas qaarkood shanboqol oo kala noocnooc ah waa gaarayaan. Dermooyinkaas inta isku xiraanoo isku xiraan ayaa waxaan kurjadaha la yiraahdo ayagoo ah ayaa doon ama awr la saaraa. Erayada sajaayad iyo salli waa isku mid. Sajaayad waxay nooga timid reerbariga ( oriente ) waa carab iyo bakistaan iyo wax la mid ah oo waa waxa midabada leh oo lagu dukado. Halka derinta cawda ah waa ku yartahay oo waa goor dhow waxay barbarteen iyo waxay dibedda kala yimaadaan maahane aad loogama yaqaanno. Annagu, reerkoofurkeenna, waxaanu sameysan jirnay bahashan Meyrada la yiraah oo ah caws yaryar. Meyradaas laba noocaa loo sameeyaa oo midna waxaa la yiraahdaa Falko, midna Sameys. Sameyska waa midda aqalka la saaro oo waa dheer tahay oo dhan kastey u gaartaa. Falkaduna waa mid kobo ah. Marka annagu waxaa niraahdaa Dhab iyo Dermo. Markey yaryar tahay oo ay Salli tahay dhab baan niraahdaa.

Axmed Nuur — Waxaan ku celinayaa Maryan Faarax.

Maryan Faarax — Marka ugu horreysa waxaa jira wax Falag la yiraahdo. Horta waxaan la sheegayo oo dhan dumarka ayaa sameeya.
Waxaas dumarka ay sameeyaan waa falag, waxayna ka kooban yihiin: cawska, meyraxda iyo cawda. Labo waxaa lagu sameeyaa xarigga geediga, rarada iyo kebedda. Wixii falag ahna waa tidic. Marka labey u kala baxaan oo midna waa caw, midna waa caws.
Falagta waxaa laga sameeyaa cawska aan laga sameyn karin rarada oo waa caws la saluugsan yahay, sameyskiisuna isagoo la feerfeeray oo cud weyn ah ayaa la sameeyaa oo xabad xabad baa loo sameeyaa markaasaa la isku tolaa, afkana waxaa looga sameeyaa Far Tidac oo afkaa laga tidcaa oo iyadoo ul ul ah oo kab kab ah ayaa la isku tolaa. Marka falag markii la yiraahdo taasaa la yiraahdaa.
Salli waa shey lagu dukado. Kemaddu waxay ka timid salli (duko). Waagii hore asagoo yar oo harag ah ayey wadaadadu sidan jireen. Markii ka dambeysayna waxaa laga sameeyey cawdan oo derin yar oo dukasho keliya loogu tala galay. Derintaas lagu dukado ayaa midna muunad loo yeelaa oo waxaa laga sameeyaa salli isku shub ahoo yar oo qurux badan. Salligaas ama maniiqo ha ahaado ama

asagoo sidiisa u cad.
Waxaa jirta Jeexgogol iydana. Sida hadalku inoo sheegaayo jeex markaad tiraahdo waa dhinac. Dermada la yiraahdo Darfooleyda waxay leedahay laba darfood oo midab qurux badan oo ganuunno leh, labada daraf ee kalane Kaabi bey ku leedahay. Darfaha ayaa midab leh inta kale wey caddahay.
Isku-shubku waa derin caw ah, cawda laga sameeyaan waa caw inta badan midabeysan, waxay leedahay ganuunno isku googoa'n oo sida rumaanka u eg amase waxay u egtahay rarada rogada ah oo Marriinka ah. Derintaas sì qurux badan ayey u sameysan tahay, dadkoo dhanna ma sameeyaane waxaa sameeya hablo farshaxanka ku dheereeyaa ama ku tegay.
Dermahaasna waxaa laga sameeyaa meesha cawdu ka baxdo Beylaba ha ugu badnaatee. Dermooyinka maniiqada aan wax badan raageyn lagama sameeyo ee waxaa laga sameeyaa cawda kale oo adag oo muddey jireysaa. Maniiqada dermooyin waa laga sameyn karaa laakiin ma raagayaan. Dermooyinka raaga waxaa laga sameeyaa cawdaa halkaa ka baxda oo adag. Kebedda Hohobka ah halkaa oo kaleeto ayey ka joogtaa magaalada waqti bey lahayd oo xadaarad gooni ah oo waqti aad loogu isticmaali jiray. Reerkii aroos ah oo reermagaal ah oo xeebaha deggan oo aan guriggoodu dermooyinkaa la dhigin wuxuu ahaan jiray guri aan jirin.
Dhamac waa derin oo yar oo waxay ku jirtaa liilan casaan ah oo aan qurux nadnayn oo yaryar ah oo waxaa ku dhex jira liilimo yaryar ah oo lagu xardhay oo warwareeg ah oo kala jeeda ayaa ku jir jira kobteeda.
Waxaa ku xigta Xiriir. Xiriirtu waa derin ah laba iskushub oo la isku daray oo waxay ka kooban tahay meel cad iyo meel casan ah oo la isku tolay, meel cad iyo meel casaan ah oo la isku tolay oo saa loo xiriiriyey.

Axmed Nur: Waxaa haray derin la yiraahdo Ceshiimo oo ah tan ugu qaalisan dermooyinka.Waxaan uga baxaayaa Daahir Afqarshe oo inooga hadlaya ceshiimo.

Daahir Afqarshe: War hee dheh, alaabtii waa la sheegay. Alaabta waxaad moodaa xaggeedii hore in meelo isaga dheceen. Haddaan dib ugu noqdo, gabadha la guursanayo ninka ilaalada ah ee aad u diranayso waxaad oranaysaa: "Gabadhii iiga warran". Markaasuu oranayaa. " Saddexda haweenka loo eego, saddexdaba waa u sawaa sawaa". Saddexda haweenka loo ego waa: Tolliimo, Tafsaar, iyo Falag. Falagu waa wixii sidaa laysku weydaarinayo oo sidaa loo laablaabayo oo waa wax dermo uun ka yimid. Iyadii baa markaa waxay tahay, mar lamaano oo saasey u kala qiimo badan yihiin. Markaad dermada iibsanayso, midina waa dhubad kaliya baa mar walba la laabayey oo dermadu waa khafiif, midna waxaa la yiraahdaa: ma cayaar baad moodeysaa tanu waa lamaane eeg oo markaa laba laagood baa la qaadayey oo dermadu waa labaqaad. Marka dabadee, saasaad iyadana u kala ogaanaysaa, markaad ama iibsanayso ama qof xariif ah oo aad garaneysid. Sida ay horta

dermadu ku socotaa sidaa weeye. Dermo maxay ka timid? Dermo waxay ka timid saddex jaad. Geedu waa cawdaas oo waa tan kaa quruxda badan noqonaysa, midini waa khafiifoo waa taa Maniiqada(Malliiqa) noqonaysa. Waa maniiqada guryihiina ka baxda oo inta la falkiyo aqalkii dushana laga saarayo, hareerahana lagaga dadbayo, haddii la doonane inta la isku xiro ay hooyada Mudac  saa ugu feereyso oo rarada laga sameynayo; mirihiisuna waa geedka cawaagta la yiraahdo oo gob yaryar, markaasuu timirta nooceedana yahay oo meel buu ka yar saran yahay oo waxaan laga aqoonin waa timir yaryar uun, laakiin laf adag oo macaan. Saddexdaa nooc baa horta wixii la falkiyaana ay ka yimaadaan. Waxa caws la yiraahdo kuwaanna waa laga sameeyaa; caws kaloo kala jaad jaad ahoo dhulkeenna cawska ka baxa ahna waa jiraa. Cawda waxay dheer tahay, labadii haddaba marka laga yimaado yimaado oo mayradii iyo maniiqadiiba ay ku reebeysaa, weelkana waa laga toshaa iyada. Wixii la tolayo ee haan ahaana dee waa tan la yiri: "Naag haan toli taqaanbaa hal laga bixiyaa".
Ceshiimada aan u soo noqdo. Inani mar haddey inanba leedahay horta waa inay dermooyin gaar ah haysaa. Illeen, maalinta laguu soo fariisto, haddaadba miyi joogto, waa inaad dermo, aan weligeedba la taaban, dadka u dhigtaa. Waa tuu ninku yiri:

"Nimanyahow, Hargeeysaan ka tegay hilikii dheeraaye,
habeen baan ka dhacay meeshan iyo harada Doolloode
harraadka iyo halaagga i qabsaday hoos umaan deyine
harkoo galay ayaa reeryo iyo reerihii tegeye".

Dermana wax aan la sheegin ma leh, laakiin intaas oo nooc yey u kala kacdaa. Waxaana laga eegaa inta kabood oo ay tahay. Yacni waxa ay magaca ku la baxayso waa inta kabood oo ay tahay. Markaasaa la oranayaa dermadu waa intaas oo kobood. Dabadeed, taa jeexgogosha ahi waa soddon kabood, markaasaa laba darfood la raaciyey. Jeexgogosha laguu sheegaya ama darfooleyda ama soddohda wanaagsan ay inanteeda u haysay kuwa caynkaas oo kale ah.

Axmed Nuur — Dermada tan la yiraahdo Lamaanada iyana waxay noqotaa mar afartan kabood oo tan guryada dibedda laga xiro. Dermooyinka waxaa ugu dheer tan ceshiimada la yiraahdo.